

## **Warbixin ardayda loogu tala galay oo ku saabsan sharciyada cusub ee barashada af-iswiidhishka ee loogu tala galay soo galootiga (sfi)**

Laga bilaabo 1-da bisha Janaayo ee sanadka 2026 waxaa dhaqan galaya xeerar cusub oo ku saabsan waxbarashada dadka waaweyn ee degmooyinka ee barashada af-Iswiidhishka ee dadka soo-galootiga ah (sfi). Halkan waxaad ka akhrisan kartaa qaar ka mid ah isbeddellada ugu muhiimsan ee ku saleysan xeerarka cusub.

### **Waxaad xaq u leedahay inaad barato maaddada sfi muddo saddex sano ah**

Isbeddel muhiim ah ayaa ah in adigaaga ardayga ah aad xaq u leedahay inaad sfi barato saddex sano laga bilaabo maalinta lagu aqbalo waxbarashada, taas oo ah maalinta uu masuulka iskuulka go'aamiyo in lagu qaatay inaad dhigato sfi.

Mas'uulka halkan waxaa loola jeedaa degmada aad wax ka barato. Waxay noqon kartaa degmada aad deggen tahay ama aad ka diiwaangashan tahay, Balse waxay sidoo kale noqon kartaa degmo kale oo ka duwan tan aad ka diiwaan gashantahay.

### **Waxaad dheereysan kartaa waxbarashada**

Waxaad sfi baran kartaa muddo ka badan saddex sano. Si kastaba ha ahaatee, si loo kordhiyo muddada waxbarashada waa in ay jirtaa sababo gaar ah. Waa mas'uulka iskuullada ayaa go'aamiya in aad xaq u leedahay kordhin ama in kale.

Sababaha gaarka ah waxay tusaale ahaan noqon karaan:

- Fasax waalidnimo
- xanuun
- shaqo
- waxbarasho kale
- sababo kale oo muhiim ah oo la xiriiira xaaladdaada.

Mas'uulka wuxuu qof walba ku sameeyaa qiimeyn shaqsiyeed. Waa inuu la socdaa xaaladdaada isla markaana kula hadlaa ka hor inta uusan go'aan gaarin.

Dhowr jeer ayaad dheereysan kartaa waxbarashada sfi, laakiin ugu badnaan lix bilood mar kasta. Laakiin guud ahaan lama kordhin karo wax ka badan saddex sano. Taas macnaheedu waa inaad sfi baran karto ugu badnaan lix sano wadar ahaan.

## **Maxaa dhacaya haddii aad joojiso ama aadan sii wadan karin waxbarashada sfi?**

Haddii aad joojiso waxbarashadaada, yacnii aad ka baxdo, waa in ay jirtaa sababo gaar ah si aad mar kale u bilaabi karto. Sidoo kale waa in aad weli haysataa waqti ka haray muddada aad sfi baran karto.

Haddii aad maqnaato in ka badan saddex toddobaad oo xiriir ah adigoon haysan sabab la oggol yahay, waxaa loo arkaa in aad joojisay waxbarashadaada.

Haddii aad haysato sabab la oggol yahay oo aad uga maqnaato waxbarashada, booskaaga sfi waa kuu yaallaa. Sabab la oggol yahay waxay tusaale ahaan noqon kartaa fasax caafimaad ama fasax uu maamulaha ku siiyay.

Masuulka sidoo kale wuxuu go'aamin karaa inaad sii wadan karin waxbarashada sfi haddii aadan samayn horumar ku filan, taas oo micnaheedu yahay inaad baran af-Iswiidhish u dhigma muddadii aad sf joogtay.

Haddii uu masuulka joojiyo waxbarashadaada, mar kale bilaabi kartaa haddii ay jiraan sababo gaar ah. Sidoo kale waa in aad weli haysataa waqti ka haray muddada sfi.

## **Racfaan ayaad ka qaadan kartaa go'aan**

Haddii masuulku diido codsigaaga ah inaad sii waddo waxbarashada sfi, waxaad xaq u leedahay racfaan. Taas macnaheedu waa inaad la xiriiri karto degmada si aad uga codsato inay beddelaan go'aanka. Kadibna waa Guddiga Racfaanka ee Nidaamka Waxbarashada (Skolväsendets överklagandenämnd) kan go'aaminaya in go'aanka la beddelayo ama in kale.

## **Qiimeyn iyo qorshe waxbarasho**

Ka hor inta aan lagu aqbalin sfi, degmadaada hooyo waa inay qiimeyso aqoontaada. Sidoo kale waa inay diyaarisaa qorshe waxbarasho oo shaqsiyeed. Qorshahan waa in lagu qoro goorta markii ugu horreysay lagaa aqbalay sfi. Haddii aad beddesho goobta waxbarasho, qorshahaaga waxbarasho shaqsiyeed waa inuu kula socdaa marka aad goob cusub billowdo.

## **Waxaad sfi ka baran kartaa degmo kale**

Waxaad fursad u heli kartaa inaad sfi ka barato degmo kale oo ka duwan taada hooyo haddii ay jiraan sababo gaar ah.

## **Adigaaga horay sfi u soo dhigtay**

Haddii lagaa aqbalay sfi ka hor 1-da bisha Janaayo sanadka 2026, waxaad xaq u leedahay inaad sfi dhigato saddex sano laga bilaabo 1-da bisha Janaayo sanadka 2026. Xaalado gaar ah ayaad ku heli kartaa kordhin. Haddii aad waxbarashada joojiso, mar kale ayaad bilaabi kartaa haddii ay jiraan sababo gaar ah. Sidoo kale waa in aad weli haysataa waqti ka haray muddada sfi.